

Miyaa laguu geystaa  
in lagu kantaroolo,  
laguu hanjabo ama  
gumeysi?  
**Soo wac telefoonkayaga  
taageeada ah!**

**0470 - 488 08**  
[kontakt@kvinnojourenblenda.se](mailto:kontakt@kvinnojourenblenda.se)



**Kvinnojouren Blenda**

Linnégatan 14A  
352 33 VÄXJÖ

**0470 - 488 08**  
[info@kvinnojourenblenda.se](mailto:info@kvinnojourenblenda.se)  
[www.kvinnojourenblenda.se](http://www.kvinnojourenblenda.se)



**Soomaali / Somali**

**Telefon 0470 - 488 08**  
**kvinnojourenblenda.se**

## Ururka taageerada dumarka ee Kvinnojouren Blenda

Ururka taageerada dumarka ee Kvinnojouren Blenda waxa weeye urur samofal ah oo ka shaqeya bulsho siman oo aan laheyn rabshadaha. Ururka waxa la dhisey 1981 iyadoo aanu xisbi iyo diin midnaba ku tiirsaneyn. Waxa Jouren wada gudi, dad shaqaale ah iyo xubno samofalayaal ah oo ka shaqeya ka hortaga nooc kasta oo rabshadaha jidh dilka, gumeysiga maskaxda, gumeysiga dhaqaalaha, gumeysiga galmaada iyo rabshadaha bulshada. Ururka taageerada dumarka ee Kvinnojouren Blenda waxay ugu horeyntii ka shaqeyssaa gumeysiga lagu sameeyo dumarka laakiin waxay ku dhiiri galinaysaa xataa dadka kale ee loo geysto rabshadaha ka yimaada qaraabodu inay la soo xidhiidhaan.

### In la raadsado kaalmo

Ururka taageerada dumarka ee Kvinnojouren Blenda waxay siisaa taageero iyo caawimo dadka la gumeystey iyadoo bixisa, wadahadalka taageerada ah iyo hoy degdeg ah. Wuxaad ka helaysaa Kvinnojouren inaan magacaaga la sheegin iyadoo aanu raacno xeerka sir haynta. Wuxaanu sidoo kale ka caawinaa xidhiidhka dawlada, daryelka caafimaadka iyo arimaha shuruucda/maxkamadaha. Marmarka qaarkood ayaa hoy degdeg ah oo ciwnaankiisu inuu qarsoodi yahay uu haboon yahay si looga fogaado hanjabaada iyo rabshadaha.

### Shaqada banaanka

Ururka taageerada dumarka ee Kvinnojouren Blenda waxay sidoo kale qabataa shaqo banaanka loogu talo galay. Wuxaanu ka warbixinaa waxqabadkayaga iyo rabshadaha dadka

qaraabada kaas oo aanu tusaale ahaan u soo jeedinaa jaamacadaha, adeega bulshada, daryelka caafimaadka, ururada iyo goobaha shaqada. Kvinnojouren waa fikir abuure muhiim ah marka laga eego degaan ahaa iyo qarankaba iyagoo ka qeyb qaata daladaha, waxbarashada iyo bandhigiyada. Ururka taageerada dumarka ee Kvinnojouren Blenda waxay sidoo kale soo qaban qaabisaa kulamada iyo aqoon koradhsiga.

### Ka qeyb qaado

Xubnaha firfircooni ee Kvinnojouren waxay qaataan waxbaasho ku sabsan waxqabadka ururka taageerada, habka gumeysiga iyo waxqabadka hawl wadeenada kale ee ka shaqeya gumeysiga ay raggu u geystaan dumarka iyo gumeysiga dadka qaraabada. Miyaad xiiseynaysaa inaad ka mid noqoto gudiga ama shaqada jourka? Waxa laga yaabaa inaad leedahay aqoon gaa ah oo aanu ka faa'iideysn karno? Noo sheeg wax dheeaad ah, ka qeyb qaadashadaadu wax weyn ayay tari kartaa?! Kaalmee ururka taageerada dumarka ee Kvinnojouren Blenda.

### Kaalmee ururka taageerada dumarka ee Kvinnojouren Blenda

Waxa jira habab badan oo lagu taageero ururka taageerada dumarka Kvinnojouren Blenda. Qiiimaha xubin ka mid ahaanshuuhu waa 100 kr sanadkii. Sadaqada iyo kafaalad qaadista ayaa si aad ah loo soo dhaweynayaa, dadka shicibka iyo shirkadahaba. Nala soo xidhiidh markaas ayaanu kuu sheegi doonaa wax dheeraad ah! Hadiyada Ditijalka waxa loo soo dirayaan bankgiro: 5379-3790 ama iyadoo la soo mainaayo Swish u dir: 123 313 87 81.

